JAMHUURIYADDA
SOMALILAND

REPUBLIC OF
SOMALILAND

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
SOLICITOR GENERAL OFFICE

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL GAZETTE
# ألنّشرة الرّسمية لجمهورية صوماليلاند


| Sannadkii 11aad | Cadad Gaar ah | Tariikhda Daabacada 26/03/2022 |
|---|---|---|


# WAX-KA-BEDELKA IYO KAABISTA XEERKA NIDAAMKA URURADA IYO AXSAABTA SIYAASADDA XEER LR.14/2011


Email: garyaqaankaguud@gmail.com
Web.www.garyaqaankaguud.com


Sannadka 2022

*Lama iibin karo*
*Not for sale*

REPUBLIC OF SOMALILAND

## THE PRESIDENT

EF. JSL/M/XERM/249-804/122011 DATE 13/12/11

# XEER MADAXWEYNE No: 0179/122011

## Dhaqan-galka Wax Ka Bedelka iyo Kaabista Xeerka Nidaamka Ururada iyo Axsaabta Siyaasadda Xeer Lr. 14/2011

## Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**Markuu Arkay:** Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

**Markuu Helay:** Go'aanka Golaha Wakiilada JSL ee Go'aan Lr. GW/KF-16/549/2011, ee Ansixinta Wax Ka Bedelka iyo Kaabista Xeerka Nidaamka Ururada iyo Axsaabta Siyaasadda;

**Markuu Arkay:** Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

**Wuxuu Soo Saaray;**

Dhaqan-galka Wax Ka Bedelka iyo Kaabista Xeerka Nidaamka Ururada iyo Axsaabta Siyaasadda ee Jamhuuriyadda Somaliland ee Xeer Lr. 14/2011 ee Qodobadan hoos ku xusan:

Qodobka 3aad, Faqradiisa 6aad, Xarfaha B, T, J, X
Qodobka 4aad, Faqradiisa 1aad
Qodobka 4aad, Faqradiisa 3aad
Qodobka 5aad, Faqradiisa 2aad
Qodobka 5aad, Faqradiisa 3aad, Xarafka J
Qodobka 11aad, Faqradiisa 4aad
Qodobka 23aad, Faqradiisa 2aad
Iyo Qodob Cusub oo ah Qodobka 29aad

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF SOMALILAND
President

**The Republic of Somaliland**
**House of Representatives**
**Head Quarter Hargeisa.**

**Jamhuuriyadda Somaliland**
**Golaha Wakiilada**
**Xarunta Hargeysa.**

Ref: GW/G/KF-16/549/2011 Date: 07/12/2011

## Ujeeddo: Go'aanka Ansixinta Wax-ka bedelka iyo kaabista Xeerka Nidaamka Ururada Iyo Axsaabta Siyaasadda

## Xeer (No: 14/2011)

**GOLAHA WAKIILADA JSL**

| | |
|---|---|
| **MARKUU ARKAY:** | Mashruuc Xeer Lr: **14/2011** Xeerka Nidaamka Ururada iyo Axsaabta Siyasadda Somaliland |
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka **9aad** iyo Qodobka **23aad** ee Dastuurka JSL. |
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka **77aad** iyo Qodobka **78aad** ee Dastuurka JSL oo tilmaamaya Habka loo raaco Xeer Dejinta. |
| **MARKUU ARKAY:** | Go'aanka ansixinta Xeer LR: 14/2011 ee Golaha Guurtida JSL kuna taariikhaysnaa **27/11/2011 (Eeg Lifaaqa)**. |
| **MARKUU ARKAY :** | In Golaha Guurtida wax ka badal iyo kaabis ku samaynin Xeerka Nidaamka Ururada iyo Axsaabta Siyaasadda ee Somaliland Xeer **Lr: 14/2011** kuna ansixiyeen sidii Golaha Wakiiladu ugu Gudbiyeen . |

## WUXUU

Golaha Wakiilada JSL halkan ugu soo Gudbinayaa Madaxwaynaha JSL Xeer **Lr: 14/2011** Xeerka Nidaamka Ururada iyo Axsaabta Siyasadda si uu uga guto waajibaadkiisa dastuuriga ah.

**ALLAA MAHAD LEH**

**Md. C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada**

**Md. C/raxmaan Maxamed C/laahi (Cirro)**
**Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL**

## GOLAHA WAKIILADU:

| | |
|---|---|
| Markuu arkay: | **Qodobada 9aad, 22aad, iyo 23aad** ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland. |
| Markuu arkay: | Soo jeedinta Madaxweynaha ee **REF: JSL/M/GW/081-717/092011** ee tixraaca **18/09/11**, ee Furashada Ururada Siyaasadda iyo Geedi socodka Doorashooyinka iyo Kaabista iyo wax ka beddelka **Xeer Lr.14/2011**. |
| Markuu Xaqiijiyay: | In ay lagama maarmaan tahay in la abuuro Xeerar iyo shuruuc kala hagta sida ay muwadiniintu u gudan karaan xuquuqdooda siyaasadeed si waafaqsan Datuurka iyagoo uga qayb-qaadanaaya hawlaha siyaasadeed si nabadgelyo ah si ay awoodda dalka u hantaan. |
| Markuu Tixgaliyay: | Mooshinka ku saabsan Kaabista iyo Wax-Ka-bedelka 2[aad,] ee Xeer Lr. 14/2011. |
| Markuu Ku Qancay: | Baahida loo qabo in kabis iyo wax-ka-beddel lagu sameeyo xeerka Nidaamka Ururada iyo axsaabta siyaasadda, xeer Lr. 14/2000. |

Wuxuu

**KAABIS IYO WAX-KA BEDDEL KU SAMEEYAY:**

Xeerka Nidaamka Ururada iyo Axsaabta Siyaasadda Xeer Lr. 14/2011,



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 3aad farqadiisa 6aad

Gudidu waxay xilka haynayaan mudo laba (2) sano ah oo ka bilaabanta maalinta ay maxkamada sare xilka u dhaariso, madaxwaynuhuna waa u cusboonaysiin karaa haddii loo baahdo, iyada oo muddo kordhintaasi cusub laga ansaxin doono Golaha Wakiilada

B. Xubnaha Gudidda waxaa xilka lagaga qaadi karaa habka loo maro xilka qaadista komishinka Doorashooyinka Qaranka.

T. Haddii ay dhacdo mudadii xilka Gudida oo aan dhammaan ay isku mar xubnaha baneeyaan jagooyinkoodii, Guddida Cusub ee la magcaabaa waxay dhammaystirayaan mudadii xilka ka hadhsanayd.

J. Haddii xubin ka mid ah Guddidda ay banayso xubinimada Gudidda, Madaxwaynaha ayaa bedelkeeda soo buuxin doona, Xubinta cusub waxa ay dhammaysan doontaa muddo xileedka u hadhsan Gudidda.

X. Xubinta/naha cusub waxa ansaxinaya Golaha Wakiilada inta aan xilka loo dhaarin.

## Qodobka 4aad

## Codsashada Diiwaan gelinta iyo Qabashada Araajida.

1. Muddada Qabashada codsiyada diwaangelintu waa shan iyo affartan maalmood gudahood (45) oo ka bilaabmaysa maalinta la daabaco ama la sii daayo baahinta qabashada codsiyada.

3 (d) _ waxaa waajib ah in lacagta cashuurtu cadahay in la wadaagay oo aysan ka bixin Gacan qudha, waxaana dabagal ku samaynaya Gudidda Diiwaan-gelinta.

## Qodobka 5aad

## Xisbiyada Qaran iyo Ururada ku meel Gaadhka ah

2. Mudada hawlgallada ururada Siyaasadeed waa lix (6) bilood gudahood waqtigana waxaa cayimaya Gudidda Diwaangelinta Ururada Siyaasadeed iyo ansaxinta Axsaabta Qaranka iyaga oo la tashanaya Gudidda Doorashooyinka Qaranka.

3.(j) Mudada Liisanku ee Xisbi Qaran Waa toban (10) taariikhda Liisanka la siiyey.

## Qodobka 11aad faqradiisa 4aad

4. Mar kasta oo la furayo tartanka ururada siyaasadda ee G/Deegaanka Lix bilood ka hor, mudanaha ka tirsan Golaha Wakiilada ama Golayaasha Deegaanka waxaa u bannaan inuu furan karo Urur siyaasadeed oo cusub ama uu ku biiri karo Urur/Xisbi siyaasadeed ee uu doono.

## Qodobka 23aad farqada 2aad

## Xisaab Xidhka

2. Hanti dhawraha madaxa banaan waxaa codsanaya hawlgalkiisa komishinka Doorashooyinka Qaranka ama Gudidda Diwaangelinta Ururada.

## Qodobka 29aad

**Khilaafaadka ka dhasha Xisbi/Urur Dhexdii ama Laba Urur /Xisbi**

1. Haddii xubnaha xisbi ama Urur isku khilaafaan hogaanka ama u kala jabaan laba meelood iyo wax ka badan, hay'adaha xisbigu/ururkuna xalin kari waayaan khilaafka, waxa dhinicii danaynayaa dacwad u gudbiyaan Gudida Diwaangelinta Ururada iyo ansixinta Axsaabta Qaranka.
2. Gudiga Diwaangelintu markuu helo dacwadda ku xusan farqadda 1aad ee Qodobkan. wuxuu ka soo saarayaa Go'aan ku salaysan Xeerka Nidaamka ururada iyo Axsaabta Siyaasadeed ee Xeer lr 14/2011. Iyo dastuurka Xisbiga/Ururka hogaankiisa laysku haysto ee laga diiwaan geliyey Gudidda – Diiwaangelinta.
3. Dhinicii ku qanci waaya go'aanka gudidda diiwaangelinta waxaa u banaan in uu racfaan u qaato Maxkamadda Sare, xukunkeeduna wuxuu noqonayaa kama dambays.
4. Haddii dhinacyada is hayaa la yimaadaan laba dastuur oo iskhilaafsan oo loo sameeyey Ururka /xisbiga hogaankiisa laysku haysto, waxaa la tixgelinayaa dastuurka laga diiwaan geliyey Gududda diiwaan gelinta ee lagu aqoonsaday urur/xisbiga.
5. Haddii khilaafka faqradaha hore ku qorani yimaado inta aan Ururka la diiwaangelin ee aan aqoonsiga la siin gudida diiwaan-gelintu ma diwaangelinayso magaca ururka hogaankiisa laysku khilaafay.
6. Dhinacyadana waxaa u banaan in mid waliba gaarkiisa u samaysto urur kale oo aan la hayn magacii laysku qabsaday.


5. Haddii khilaafka faqradaha hore ku qorani yimaado inta aan Ururka la diiwaangelin ee aan aqoonsiga la siin gudida diiwaan-gelintu ma diwaangelinayso magaca ururka hogaankiisa laysku khilaafay.
6. Dhinacyadana waxaa u banaan in mid waliba gaarkiisa u samaysto urur kale oo aan la haynmagacii laysku qabsaday.


7. Haddii laba urur ama urur iyo xisbi isku qabsadaan magaca ama astaanta diiwaangelinta ka dib, waxaa loo aqoonsanayaa in uu leeyahay magacaas ama astaantaas kan Gudiddu u diwaangelisay ama loo hor diwangeliyey.

**C/raxman Maxamed C/lahi (Ciro)**
**Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL**

______________________

**C/risaq Sicid Ayanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL**

______________________

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

**REPUBLIC OF SOMALILAND**

## THE PRESIDENT

REF. JSL/M/XERM/249-683/082011

DATE 20/08/11

# XEER MADAXWEYNE No: 0168/082011

## Dhaqan-galka Xeer Lr. 14/2011
## Xeerka Nidaamka Ururada iyo Axsaabta Siyaasadda

## Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**Markuu Arkay:** Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland,

**Markuu Helay:** Go'aanka Golaha Wakiilada JSL ee Go'aan Lr. GW/KF-15/534/2011, ee Ansixinta Xeerka Nidaamka Ururada iyo Axsaabta Siyaasadda,

**Markuu Arkay:** Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

**Wuxuu Soo Saaray,**

**Dhaqan-galka Xeerka Nidaamka Ururada iyo Axsaabta Siyaasadda ee Jamhuuriyadda Somaliland ee Xeer Lr. 14/2011.**

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF SOMALILAND
President

## Ujeeddo: Go'aanka Ansixinta Xeerka Nidaamka Ururada Iyo Axsaabta Siyaasadda

## Xeer (No: 14/2011)

**GOLAHA WAKIILADA JSL**

| | |
|---|---|
| MARKUU ARKAY: | Mashruuc Xeer Lr: **14/2011** Xeerka Nidaamka Ururada iyo Axsaabta Siyasadda Somaliland |
| MARKUU ARKAY: | Qodobka 9aad iyo Qodobka 23aad ee Dastuurka JSL. |
| MARKUU ARKAY: | Qodobka 77aad iyo Qodobka 78aad ee Dastuurka JSL oo tilmaamaya Habka loo raaco Xeer Dejinta |
| MARKUU ARKAY: | Go'aanka ansixinta Xeer LR: 14/2011 ee Golaha Guurtida JSL kuna taariikhaysnaa **13/08/2011 (Eeg Lifaaqa)** |
| MARKUU ARKAY: | In Golaha Guurtida wax ka badal iyo kaabis ku samayniin Xeerka Nidaamka Ururada iyo Axsaabta Siyaasadda ee Somaliland Xeer **Lr: 14/2011** kuna ansixiyeen sidii Golaha Wakiilada ugu Gudbiyeen. |

## WUXUU

Golaha Wakiilada JSL halkan uga soo Gudbinayaa Madaxwaynaha JSL Xeer Lr: 14/2011 Xeerka Nidaamka Ururada iyo Axsaabta Siyasadda si uu uga guto waajibaadkiisa dastuuriga ah

**ALLAA MAHAD LEH**

Md. C/risaaq Siciid Axmed
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada

Md. C/raxmaan Maxamed C/laahi (Cirro)
Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL

## GOLAHA WAKIILADU:

| | |
|---|---|
| Markuu arkay: | Qodobada 9aad, 22aad, iyo 23aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland. |
| Markuu arkay: | Xeer Madaxweyne ee Lr. 0165/07/2011 ee tixraaca RSL/M/ERM/249-635/07211 ee Furashada Ururada Siyaasadda iyo Geedi Socodka Doorashooyinka iyo Kaabista iyo wax ka beddelka Xeer Lr.14/2000. |
| Markuu Xaqiijiyay: | In ay lagama maarmaan tahay in la abuuro Xeerar iyo shuruuc kala hagta sida ay muwadiniintu u gudan karaan xuquuqdooda siyaasadeed si waafaqsan Datuurka iyagoo uga qayb-qaadanaaya hawlaha siyaasadeed si nabadgelyo ah si ay awoodda dalka u hantaan. |
| Markuu Tixgaliyay: | In muwaadiniintu ay xaq u leeyihiin in ay helaan xuquuqdooda siyaasadeed iyo gudashada waajibaadka saran marka ay abuurayaan Ururo siyaasadeed iyo in la habeeyo mabaadii'da iyo shuruucda kala hagaysa Xisbiyada qaranka ee shakhsiyadda qaanuuniga ah leh. |
| Markuu Ku Qancay: | Baahida loo qabo in kabis iyo wax-ka-beddel lagu sameeyo xeerka Nidaamka Ururada iyo axsaabta siyaasadda xeer Lr. 14/2000. |

### Wuxuu

### KAABIS IYO WAX-KA BEDDEL KU SAMEEYAY:

Xeerka Nidaamka Ururada iyo Axsaabta Siyaasadda Xeer Lr. 14/2000, wuxuuna soo-saaray Xeer Lr. 14/2011

## QAYBTA 1AAD

### Qodobo Guud

### Qodobka 1aad: Eray bixin

1. **"Guddi":** waxaa loola jeedaa Gudidda Diiwaangelinta Ururada Siyaasadda Iyo ansixinta xisbiyada Qaranka.
2. **"komishan":** waxaa loola jeedaa komishanka Doorashooyinka Qaranka (K D Q)
3. "**Gobol/Degmo**": waxaa loola jeedaa Gobollada iyo degmooyinka ku xusan Xeer lr 23/2002.
4. **"Urur Siyaasadeed":** waxaa loola jeedaa koox muwaadinin ah oo wadaaga fikir siyaasadeed Oo isu diwaangeliya Urur ahaan si ay uga qayb qaataan doorashooyinka Golayaasha Deegaanka ka hor inta aan loo aqoonsan Xisbiyo Qaran
5. **"Xisbi/xisbiyo":** waxaa loola jeedaa xisbi/Xisbiyada Qaran ee la ansixiyey si ay uga qayb qaataan doorashooyinka Guud ee Golaha wakiilada iyo kuwa M/waynaha iyo kuxigeenkiis
6. **"Ajanebi":** waxaa loola jeedaa shakhsi kasta oo aan u dhalan Jamhuuriyadda Somaliland
7. **"Warbaahinta Dawladda":** waxaa loola jeedaa Idaacadaha, Wargaysyada, shineemooyinka, Telefishinka Qaranka iyo Nooc kasta oo warbaahineed oo Dawladu Maamusho
8. **"Hantida Dawladda":** waxaa loola jeedaa hantida Guurtada ah iyo ta Ma-guurtada ah ee ay Dawladdu leedahay nooc kasta ha ahaatee.
9. **"Arjiga Codsiga":** waxaa loola jeedaa foom gaar ah oo uu diyaariyey Gudidda Diwaangelinta Ururada siyaasada Iyo Ansaxinta xisbiyada Qaranka oo faafaahinaya shuruudaha laga rabo in uu buuxiyo Urur Siyaasadeed kasta oo is Diiwaangelineya.
10. **"Doorashhoyinka Qaranka":** waxaa loola jeedaa doorashooyinka Guud ee ay ku tartamayaan Saddexda Xisbi Qaran.
11. **"Hogaamiyeyaasha Urur/Xisbi Qaran":** waxaa loola jeedaa Hogaanka sare ee xisbi /Ururoo uu ka mid yahay Gudoomiye, Gudoomiye-ku xigenada. Xoghayaha Guud iyo ku- xigeenkiisa.
12. **"Golayaasha Sharciga ah":** waxaa loola jeedaa Dastuuriga ah ee JSL oo kala ah

**B. Golaha Guurtida**

**T. Golaha Wakiilada**

**J. Golaha Deegaanka**

## QAYBTA 2AAD

### Qodobka 2aad

### Maabaadii'da Guud Iyo U Hogaansanaanta Sharciga

1. Xisbiyada/Ururadu waa in ay u hoggaansanaadaan Dastuurka, Xeerarka dalka iyo hanaanka Dimoqraadiyadda, waana in aanu wax u dhimaynin midnimada dalka dhammaanshaha dhul ahaaneed ee Jamhuuriyadda Somaliland iyo nabadgelyada guud.
2. Xisbiyada /Ururadu waa in ay ka qayb-qaataan in ay taageerayaashooda baraan tartanka doorashooyinka iyo dimuuqraadiyada waana in ay tix-gelin dheeraad ah siiyaan Haweenka iyo dhalinyarada.



XAFISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

3. Xisbiyada/Ururadu waa in aanay ku salaysnayn Qabiil, lab ama dheddig keliya, ama nooc kale oo kasta oo Bulshada kala faquuqaaya
4. Xisbiyada Qaranka iyo Ururada waxaa lagu maamulayaa si waafaqsan xeerkan isla markaana aan ka soo hor jeedsan shareecada islaamka, Dastuurka Qaranka, xeerarka dalka, iyo xeeraraka Xisbiyada ama Ururada:
5. Cid kasta oo reer Somaliland ah buuxisana shuruudaha xeerkan wuxuu xaq u yeelanayaa in uu samaysto Urur siyaasadeed si waafaqsan Xeerkan;
6. Marka ay dhacdo in laba urur iyo in ka badini isu tagaan si ay u samaystaan is-bahaysi ama Urur/xisbi ku biiro inta ka horaysa doorashada Goleyaasha Degaanada, waxa loo soo gudbinayaa Gudidda Diiwaan-gelinta Ururada siyaasadda iyo ansixinta Axsaabta Qaran ka nuqul asal ah (original) oo ah heshiiska isbahaysiga ah.

## QAYBTA 3AAD

## QAABDHISMEEDKA IYO XILKA GUDIDDA DIWAANGELINTA

### Qodobka 3aad

### Gudidda Diwaangelinta Ururada Siyaasadda iyo Ansixinta Axsaabta Qaranka.

1. Dalka JSL wuxuu yeelanayaa Guddi guud oo madax-banaan, una xilsaaran diiwaangelinta Ururrada Siyaasada iyo Ansixinta Axsaabta Qaranka.
2. Tirada Gudiddu waa 7 (todoba) xubnood oo ugu yaraan mid ka mid ahi sharci-yaqaan yahay.
3. Gudiddu waxay iska dhexdooranaysaa Gudoomiye, Gudoomiye xigeen iyo Xoghaye.
4. Guddida waxa lagu soo xulanayaa shuruudaha hoos ku qoran: -
   b. Inuu Muslin yahay/tahay kuna dhaqmo diinta Islaamka.
   t. Inuu Muwaadin yahay/tahay da'diisuna ka yaraan 30 sanno.
   j. Inuu/inay jidh ahaan iyo caqli ahaanba u gudan karo xilkiisa.
   x. Inuu/inay leeyahay aqoon wax barasho oo gaadhsiisan shahaadada koowaad ee jaamacadda (First Degree)
   kh. In aanu/inaanay hore ugu dhicin xukun ciqaabeed oo Kama dambays ah oo Maxkamada horteed kaga cadaaday shantii sanno ee u dambayasay
   d.inuu /inay yahay xilkas, dhaqankiisa iyo akhlaaqdiisuna toosan yihiin yahayna shakhsi ku sifooba dhexdhexaadnimo.
   r. inuu/inay leeyahay waayo- aragnimo shaqo iyo maamul oo dhan shan sanno ugu yaraan.
   s. inuu /inay ku sugnaan/sugnayd dalka JSL labadii sanno ee ugu dambeeyahay si xidhiidh ah.
   sh. Halka sharci yaqaan waxa u dheer shuruudahaasi inay leeyahay/leedahay shuruudaha lagu soo doorto garsoorayaasha Maxkamada Sare.
5. Xarunta dhexe ee guddidu waxay ahaanaysaa Hargeysa waxayna ku yeelanayaan wakiilo gobolada iyo degmooyinka dalka.
6. Guddidu waxay xilka haynayaan muddo (2) labo sano ah oo ka bilaabanta maalinta ay Maxakamada sare xilka u dhaariso.
7. Madaxweynaha JSL ayaa magacaabaya Gudidda diiwaangalinta ururada siyaasada iyo ansixinta Axsaabta Qaranka.
8. Golaha wakiilada ayaa kalabadh iyo hal (41+1) tirada guud ku ogolaanaya gudidda diwaan galinta urarada siyaasada iyo ansixinta axsaabta qaranka.
9. Guddidu waxay yeelanayaan gunno la mid ah Gunada Komishanka Qaranka la siiyo.
10. Gudoomiyaha Maxkamadda Sare ayaa ku dhaarinaya Guddida dhaartan todobaad ka dib maalinta Golaha Wakiiladu ansixiyo **(WAXA IGU WALAAHIYA, BILAAHIYA, INAANAN KA MID**



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH

AHAYN KUNA JIRIN UNUG, URUR IYO XISBIYO QARAN TOONA, KANA MID NOQONEYN URUR IYO XISBI KALE INTAAN XILKA HAYO. UGUNA ADEEGAYO BULSHADA SOMALILAND CADAALAD, SINAAN IYO DAACADNIMO).

## QAYBTA 4AAD
## HABRAACA DIWAANGELINTA
### Qodobka 4aad
### Codsashada Diiwaangelinta iyo Qabashada Araajida

1. Guddidu waxay ku baahinaysaa warbaahinta dalka mudada qabashada codsiyada diiwaangelinta Ururada siyaasadeed, iyo mudada dhamaadka qabashada codsiyada diiwaangelinta. Mudada qabashada codsiyada diiwaangelintu waa laba bilood gudahood (lixdan maalmood) oo ka bilaabmaysa maalinta la bilaabo baahinta qabashada codsiyada
2. Urudada siyaasiga ah ee cusub waxay is ka diwaan galinayaan xarunta guud ee Gudida diwaan galinta ururada siyaasada iyo ansixinta asxsaabta qaranka ee Hargaysa.
3. Urur kasta oo doonaya in loo diiwaangeliyo Urur siyaasadeed waa inuu ku soo qortaa arji foomka loogu talagalay, kuna soo hagaajiyaa Guddida, kuna lifaaqnaadaan caddaymaha iyo qoraalada soo socda: -
   b) Goortii iyo goobtii ururku ku qabtey shirkii aasaaska ee ugu horeeyay.
   t) Liiska magacyada aasaasayaasha ururka iyo habkii loo doortey.
   j) Liiska magacyada hogaanka, gudidda fulinta iyo golaha dhexe oo gudoomiyaha ama ku-xigeenku soo sexeexay.
   x) Qaab-dhismeedka ururka oo ay ku caddahay magaca ururka oo dhan iyo habka uu u qormayo marka la soo gaabiyo iyo astaanta ururka.
   kh) Caddeyn bixin cashuurta diwaangalinta oo dhan **150, 000,000** (Boqol iyo konton milyan) shilin Somaliland.
   d) Xisbiyada qaran ee haysata shahaadada xisbinimo laga ma qaadayo cashuurta diwaan galinta.
   r) Mudada liisanka ee xisbi qaran waa toban (10) sano oo ka bilaabma taariikhda liisanka la siiyay.

### Qodobka 5aad:
### Xisbiyadda Qaran iyo Urarada ku meel-gaadh ka ah

1. Markay dhamaato mudada qabashada araajida diiwaangelinta Ururrada, Gudiddu diwaangalinta ururada siyaasida ah iyo ansixinta axsaabta Qaranka waxay hubinaysaa ururada buuxiyey shuruudihii looga baahnaa, waxayna siinayaan ogolaansho ku meelgaadh ah oo uu ururkaasi ku hawlgalo.
2. Mudada hawl-galada ururada siyaasadeed waa 6 bilood oo ka bilaabanta taariikhda ogolaanshaha ku meel gaadhka ah la siiyey.
3. Xisbi/Urur kasta waa inuu ku keenaa mudada ku xusan Faqrada 2aad ee Qodobkan qoraalada iyo caddeymaha soo socda: -
   b. Qabashadii shirweynaha ee Ururka ama xisbiga, meeshii uu ku qabtey, taariikhduu qabsoomay iyo wixii ugu weynaa ee ay qabteen, Sida liiska magacyada xubnaha golaha dhexe, Guddida Fulinta iyo magacyada hogaanka xisbiga.
   t. Caddeyn in Ururkaasi ku leeyahay laamo hawlgal ah, ugana diiwaan-gashan yihiin ugu yaraan 1000 (Kun qof) xubnood gobol kasta, kuwaas oo haysta warqda aqoonsiga muwaadinimo oo sharci ah.
4. Ururka la siiyo ogolaansho ku meel gaadh ah oo uu ku hawl-galo, waa in Guddidu siisaa afar (4) nuqul oo xeerkan ah
5. Xisbi/urur kasta oo siyaasadeed waa in xeerkiisa ku caddahay ku dhaqanka dimoqraadiyadda, tallo-wadaaga iyo maamul wanaag.
6. Urur kasta waa inuu gudidda u keeno 3 nuqul oo daabacan oo ah xeerkiisa iyo cinwaanadiisa gobolada iyo degmooyinka dalka.
7. Xisbi/urur kasta waa in xeerarkiisu waafaqsan yahay Dastuurka iyo Xeerarka dalka JSL.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

8. Xisbi/urur kasta waa inuu xubin ka noqon karo qof kasta oo Somalilander ahi.
9. Ururka Siyaasadeed ee loo ansixiyo xisbi, kuma biiri karo xisbi kale doorashooyinka ka hor iyo ka dib, sidoo kale waa inay xeerkiisa ku cadaataa inaan laga saari Karin/eryi Karin xisbiga xubin ama xubno loo doortay Golayaasha Sharciga ah hadii aanay ka hor imanayn Xeerar ka dalka iyo xeerka xisbiga.
10. Xisbi kasta oo qaran waa inay barnaamijkiisa ku cadaato qorshayaashan.
    b. Sugidda nabadgelyada, deganaanshaha iyo xasiloonidda dalka.
    t. Horumarinta waxbarashada iyo Diinta
    j. Horumarinta caafimaadka iyo fayo-dhawrka.
    x. Daryeelka iyo ilaalinta degaanka.
    kh. Dhaqaaleynta iyo soo saaridda kheyraadka dabiiciga ah ee dalka
    d. Horumarinta cilmiga iyo teknoolajiyada.
    r. Dhiiri gelinta dhalinyarada iyo haweenka ee ka qayb qaadashada siyaasada dalka.
    s. Ilaalinta Dastuurka iyo xeerarka dalka.

## Qodobka 6aad

## Kala reebida Xisbiyada/Ururada ku tartama doorashada Deegaanka

1. Saddexda xisbi/Urur ee doorashada Dawladaha Hoose ka hela 20% codadka gobol kasta ayaa loo aqoonsanayaa Xisbi qaran, lana siinayaa shahaadada aqoonsiga xisbi.
2. Haddii hal xisbi oo keliya ku guulaysto doorashada oo uu ka helo 20% codadka gobol kasta, Guddidu waxay u aqoonsanaysaa xisbiyo Qaran isaga iyo labada Xisbi ee ku xiga isu gaynta codadka boqolayda gobol kasta.
3. Hadii ay is leekaato tirada Boqoleyda Gobolada ee laba Urur ama ka badan waxaa lagu kala saarayaa. Sida ay ugu kala Bataan tiradada guud ee codad ka.
4. Haddii ururada siyaasadeed midna gaadhi waayo 20% waxay Guddidu u aqoonsanayaan Xisbiyo Qaran saddexda Xisbi ee ugu tirada badan codadka doorashoonyinka boqolayda gobolada dalka.
5. Tobankii (10) sannadoodba mar baa la abuuri karaa Urur Siyaasadeed si waafaqsan Xeerkan. Hase-yeeshee waa in Urur Siyaasadeed la abuuraa 6 (lix) bilood ka hor maalinta la qabanaayo doorashada Goleyaasha Deegaanka.

## Qodobka 7aad:

## Waxyaabaha ka reebban Xisbiyada/Ururada

1. Waxaa ka reebban xisbi/urur kasta inuu u soo gudbiyo Guddida war bixin been ah ama khaldan.
2. Xisbina kama muuqan karto xeerarkiisa qodob ama qodobo ka hor imanaya Dastuurka iyo Shareecada Islaamka.
3. Xisbi/Urur kasta waxaa ka reebban inuu dhaqaale ka helo illo shisheeye.
4. Xisbi/urur kasta waxaa ka reebban inuu hantida qaranka Somaliland u adeegsado ama u isticmaalo hawlihiisa u gaarka ah ee doorashooyinka.
5. Xisbi/urur kasta waxaa ka reebban inuu adeegsado koox ama ciidan hubaysan oo uu ku fushado danihiisa gaarka ah.

## Qodobka 8aad:

## Xuquuqda Xisbiyadda Qaranka

1) Xisbiyada Qaranka ee la siiyey shahaadada xisbinimo qaran, waxay xaq u leeyihiin:
    b. Inay si siman u adeegsadaan warbaahinta qaranka, waxayna yeelan karaan Warbaahin u gaar ah markey ogolaansho ka helaan hay'adaha ku shaqada leh.
    t. Inay si xor ah u gudbiyaan afkaartooda siyaasadeed iyagoon wax u dhimayn xasiloonida iyo nabadgelyada guud ee dalka.
    j. inaan la cabudhinkarin mas-uuliyiinta xisbiyada ciidamada amaankuna aanay gali karin xarumohooda ilaa ogolaasho laga helo Maxkamadda awooda u leh,
    x. xisbiyada Qaranka ee mucaaridka ahi way dhaliili karaan xukuumada



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

kh. Xisbiyadu wixii dacwad ama cabashooyin ay ka tawdaan shaqada Guddida diwaan galinta ururada siyaasada iyo ansixinta axsaabta Qaranka waxay qoraal ahaan ugu gudbinayaan maxkamadda gobolka ay cabashadu ka jirto.

d. Haddii ay ku qanci waayaan go'aanka maxkamadda gobolku ka soo saarto, waxay racfaan uga qaadanayaan Maxkamadda Dastuuriga ah

r. Xibiyada qaranku way yeelan karaan hanti gaar ah.

## Qodobka 9aad:
## Xuquuqda Muwaadiniinta

Muwaaddin kasta oo qaangaadh ah, wuxuu xaq u leeyahay: -

1. Inuu/inay ka qayb-qaato hawlaha siyaasadda.
2. Inuu/inay ku biiri karo xisbi ama urur siyaasadeed kuu/kay doorto.
3. Xubnaha ururku ama xisbigu waxay leeyihiin xuquuqo isku mid ah xaqa doorashada iyo codayntaba marka lagu guda jiro xilliga doorashada xisbiga/ururka gudihiisa.
4. Xubin kasta oo doonaysa in ay ka baxdo xil xisbi ama urur.
   b) Waa in xubinta xisbiga/ururku u soo gudbisaa arjiga is casilaada.
   t) Waa in xisbiga /ururku ku aqbalaa ama ku diidaa 14 maalmood gudahood is casilaada xubinta.
5. Xubinina kama wada tirsanaan karto laba Xisbi/Urur ama Xisbi iyo Urur isla wakhti keliya

## Qodobka 10aad:
## Sababaha Lagu Waayi Karo Xubinnimada

Xubin ka tirsan Xisbi ama Urur waxaa laga saari karaa oo keliya marka:

b) Ay samaysato urur kale
t) Ay Ka qayb-qaadato urur kale oo la samaynayo
j) Ay Ku biirto urur kale ama si caam ah ugu ololaysa samaysiga urur kale
x) Ay ku gafto xeerka u yaalla xisbiga/ururka

## Qodobka 11aad
## Musharixiinta U tartamaysa Doorashooyinka iyo Golaha wakiilada iyo Deegaanka

1. Qofkasta oo muwaadin somalilaand ahi wuxuu xaq u leeyahay in la doorto waxna dooran karo, haseyeeshee waxaa musharax noqon kara;
   b) Muwaadin Somaliland ah, xisbina soo sharaxay, buuxiyeyna shuruudaha Xeerku jideeyey.
   t. Ma banana in musharax madax-banaan oo aan magac xisbi wadanin isa soo sharaxo.
2. Gudidda fulinta ee xisbiyada ayaa soo magacaabaya musharixiinta uga qayb galaya Doorashada Golaha wakiilada
3. Gudidda Xisbi ee Gobol kasta ayaa soo magcaabaya musharixiinta heerka degmooyinka.

## Qodobka 12aad:
## Mudada xilka Madexweynaha iyo Gudoomiyaha Xisbiga

1. Qofna jagada madexweynaha ma qaban karo laba jeer wax ka badan.
2. Xisbi qaran jagada gudoomiyaha xisbiga uma sharixi karo xubin laba xildoorasho wax ka badan.

# QAYTA 5AAD:
# XEER-HOOSAADKA, QAAB-DHIMEEDKA IYO SHAQADA URURRADA SIYAASADDA

## Qodobka 13aad:
## Xeer-hoosaadka iyo Qaab-dhismeedka Ururrada Siyaasadda

Xeer-hoosaadka Ururrada Siyaasadda waa in ay ku cad yihiin: -



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

1. Magaca Ururka oo dhamaystiran.
2. Ujeeddooyinka Ururka.
3. Qaab-dhismeedka Ururka iyo Waaxyaha uu ka kooban yahay.
4. Xarunta dhexe ee Ururka oo ah Somaliland gudaheeda.
5. Qaabka lagu soo doorto ama lagu beddeli karo, muddada xilka ee mas'uuliyiinta Ururka.
6. Shuruudaha Xubinta lagu noqon karo iyo sababta lagu waayi karo, iyo iscasilaadda xubinta ama mas'uulka
7. Qodobbo khuseeya sida Xeer-hoosaadka Ururka wax looga beddeli karo.

## Qodobka 14aad:
## Reebbanaan

Uma banaana qof kasta oo ka tirsan Ciidammada Qalabka sida: Ciidanka qaranka, Ciidanka Booliska, Ciidanka Asluubta, hay'adaha sirdoonka qaranka, Ururada aan Dawliga ahayn, shaqaalaha dowlada (civil servant) iyo xubnaha ka tirsan Garsoorka, Xeer-ilaalinta, iyo gudidda diwaan galinta ururada siyaasada iyo ansixinta xisbiyada qaranka in ay:
1. Samaystaan Urur Siyaasadeed iyo xubin ka-noqoshadiisaba.
2. In loo magacaabo xafiis Urur Siyaasadeed.
3. Ku lug-yeelato arrimo Axsaab/Urur oo luminaaya dhex-dhexaadnimada xafiiska uu joogo.
4. Taageerid ama ka-soo-hor-jeedsi Xisbi/Urur Siyaadadeed.

## Qodobka 15aad:
## Astaamaha iyo Magacyada

Ururna ma isticmaali karo astaan ama magac uu hore u isticmaalay Urur kale, xisbi, Hay'adaha Dawladda ama Qaranka Somaliland.

## Qodobka 16aad
## Hoggaamiyeyaasha Xisbi/Urur Siyaasadeed

Qofka isu sharraxaaya hogaanka Xisbi/Urur Siyaasadeed waa in uu buuxiyo shuruudahan:
1. Waa inuu/inay yahay muwaaddin reer Somaliland ah.
2. Waa in/inay ay da'diisu tahay ugu yaraan 30 jir.
3. Waa in/inay aanu ku dhicin xukun maxkamadeed oo ah fal-dambiyeed uu gaystay oo ka badan 3 (saddex) sanno 5tii sanno ee u dambaysay marka laga reebo in Madexweynaha JSL uu siiyay cafis.
4. Waa in/inay uu yahay qof muslin ah kuna dhaqma diinta islaamka.

## Qodobka 17aad:
## Isbeddelka Hoggaanka iyo shuruucda Xisbiga/Ururka

1. Isbeddel kasta oo lagu sameeyo hoggaanka, shuruucda iyo Qaab-dhismeedka Xisbiga/Ururka waa in laga sheego warbaahinta ugu badnaan 15 maalmood ka dib marka uu Xisbigu/Ururku qabsado shirka uu ku gaadhay go'aanka isbeddelkaas.
2. Isla markaana waa in qoraal rasmi ah oo arrintaa ku saabsan loo diro xeer-ilaalinta guud, gudidda diiwaangelinta ururada siyaasadda iyo ansixinta xisbiyada qaranka iyo komishanka doorashooyinka qaranka mudo aan ka badnayn 15 maalmood.



XAFISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

## QAYBTA 6AAD:
## WARBAAHINTA IYO HANTIDA XISBI/URUR SIYAASADEED
## QODOBKA 18AAD:
## WARBAAHINTA XISBIGA AMA URURKA

1. Xisbi/Urur Siyaasadeed waxa uu xaq u leeyahay in uu abuuro Warbaahin uu gaar ah si waafaqsan shuruucda iyo xeerarka dalka ee khuseeya warbaahinta gaarka ah.
2. Xisbi/Urur Siyaasadeed waxa ka mamnuuc ah in ay faafiyaan, daabacaan ama baahiyaan warar been ah, isla markaana abuuraaya kicin iyo iska-hor imaad dadweyne, wiiqaaya midnimada dalka, ama waxyeello u gaysanaaya nabadgelyada guud.
3. Xisbiyada/Ururada Siyaasaddu waxay si siman u isticmaalayaan warbaahinta ay Dawladdu maamusho wakhtiga ololaha doorashooyinka Qaranka.

### Qodobka 19aad:
### Hantida Xisbi/Urur

Hantida Xisbi/Urur waxa ay ka iman kartaa:
1. Qaadhaanka ay xubnaha Xisbi/Urur bixiyaan.
2. Deeqda la siiyay Xisbiga/Ururka waa in ay ka timaado shirkado wadani ah, ama muwaadiniin reer Somaliland ah.
3. Kaalmo ay si siman u bixisay xukuumasddu.

## QAYBTA 7AAD:
## XISBIYADA SIYAASADDA EE JIRA
### Qodobka 20aad:
### Shakhsiyadda Qaanuuniga ah ee Xisbiyada

1. Saddexda xisbiyo Qaran ee loo aqoonsado xisbiyo qaran waxa ay leeyihiin Shakhsiyad Qaanuuni ah (Legal Personality).
2. Xisbiyada qaranka waxa ay xaq u leeyihiin in ay u tartamaan Doorashooyinka Deegaanka ee soo socda. Haseyeeshee, waa in ay Gudida diwaan-gelinta ururada siyaasada iyo ansixinta axsaabta qaranka u soo gudbiyaan waxyaalahan: -
   b. Magaca Xisbiga oo dhamaystiran
   t. Ujeeddooyinka Xisbiga;
   j. Qaab-dhismeedka Xisbiga iyo Waaxyaha uu ka kooban yahay
   x. Xarunta dhexe ee Xisbiga oo ah Somaliland gudaheeda.
   kh. Qaabka lagu soo doorto ama lagu beddeli karo, muddada xilka ee mas'uuliyiinta Xisbiga,
   d. Shuruudaha Xubinta lagu noqon karo iyo sababta lagu waayi karo, iyo iscasilaadda xubinta ama masuulka,
   r. Qodobbo khuseeya sida Xeer-hoosaadka Xisbiga wax looga beddeli karo.

### Qodobka 21aad:
### Ganaaxa ku xad-gudubka xeerka

Gudiddu waxa ay ganaax lacageed oo dhan Sodon milyan oo shillinka Somaliland ah (30,000,000 SL/Sh) ku soo rogayaa Xisbiga/Ururka ku xad-gudba Xeerkan.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## QAYBTA 8AAD
### Qodobka 22aad:
### Waxyaabaha ka reeban adeegsiga deeqaha dawladda siiso Xisbiyada

Deeqaha dawladda looma isticmaali karo si toos ah ama si dadban in loogu qorsheeyo samaynta ganacsi gaar loo leeyahay, ha ahaato hanti guurto ah ama tu ma-guurto ahba.

### Qodobka 23aad:
### Xisaabxidh

Xisbi Qaran kastaa waxaa uu samaynayaa xisaab xidh sanadeed (dakhli iyo kharash) uu soo cadeeyay hanti dhawre madax banaan, waxaana loo gudbinayaa komishanka doorashooyinka Qaranka ugu danbayn 31 March ee sanad kasta.

## QAYBTA 9AAD
## QODOBO KALA DUWAN

### Qodobka 24aad
### Xisbiga Dhaca ama Ururka u Gudbi Waaya Xisbi

1. Xisbi kasta/Urur oo ku guulaysan waaya doorashada Goleyaasha deegaanka waxay ku biirayaan iyaga iyo xubnahooda golayaasha deegaanka ee ay ka helaan degmoyinka dalka saddexda Xisbi qaran ee soo baxay kay doonaan, waxayna qoraal ahaan u gudbinayaan Guddidda Diwaangelinta ururada siyaasada iyo ansixinta xisbiyada qaranka muddo aan ka badnayn hal bil (30maalmood)

2. Haddii xisbigii mudanaha Golaha wakiiladu uu ka tirsanaa ku dhaco tartarka Ururada iyo Xisbiyada waa in mudanuhu ku biiraa xisbiga qaran ee uu doorto, wuxuuna dhamaysanayaa mudo xileed ka u hadhsan.
3. Madaxweynaha iyo ku xigeenkiisu waxay dhamaysanayaan mudada xilkooda inta uga hadhsan hadii xisbigoodu soo bixi waayo waxaana u furan inay galaan xisbigay doonaan.

### Qodobka 25aad:
### Tayaynta iyo habaynta xisbiyada Qaranka

1. Xisbiyada Qaranka ee Doorashada ku guulaystaa waa in ay ku dhaqmaan maa-mul wanaag iyo dimuquraadiyada dhexdooda ah, waana in awooda loo siman yahay. Talada xisbigana waa in mar kasta lagu go'aan qaataa qaabka uu dhigaayo xeer hoosaadku.

2. Shirweynaha Xisbi Qaran waxaa la qabanayaa 5 (shantii sano) hal mar waxaana la baahinayaa Lixdan maalmood (60) ka hor
3. Shirka xisbi ee golaha dhexe waxaa la qabanayaa halkii sanaba mar waxana la baahinayaa 30 casho ka hor.
4. Shirwaynaha Xisbiga waxaa lagu soo dooranayaa
   b. Xubnaha Hogaanka Xisbiga iyo gudidda fulinta

   t. Xubnaha golaha dhexe ee Xisbiga.

   j. waxaa lagu ansixinayaa Barnaamijka iyo xeer hoosaadka Xisbiga.

5. Liiska xubnaha guddida fulinta iyo golaha dhexe ee xisbi iyo nuqul xeer-hoosaadkooda ah waxaa loo gudbinayaa xeer-ilaalinta, komishanka doorashooyinka qaranka iyo gudida diwaan gelinta ururada siyaasada iyo ansixinta xisbiyada qaranka mudo aan ka badnayn **30 maalmood** shirwaynaha ka dib.
6. Hogaanka xisbiga, Guddida fulinta iyo xubin golaha dhexe waxaa xilka qaadistooda soo jeedin kara.

   b. 1/3 xubnaha golaha Dhexe ee xisbiga

   t) Gudoomiyaha xisbiga.

   j) Is-casilaad.

   Waxaana cod kala-badh iyo hal ku ansixinaya xubnaha golaha dhexe ee xisbiga.

7. Gudidda diwaangelinta Ururada Siyaasada iyo Ansixinta Xisbiyada Qaranka ayaa xisbiyada dhexdooda ku ilaalinaya Dimuqraadiyada, iyagoo war bixintooda u soo gudbinaya Golaha Wakiiladda marka loo baahdo.
8. Marka mudo xileedka Gudidda diwaangelinta Ururada Siyaasada iyo Ansixinta Xisbiyada Qaranka uu dhamaado waxaa shaqadooda la wareegaya komishanka doorashooyinka qaranka.

## Qodobka 26aad:
## Soo Saaridda Xeer-Nidaamiye (Power to Issue Regulations)

Gudida Diwaangelinta Ururrada iyo Ansixinta xisbiyada Qaranku waxa uu awood u leeyahay in uu soo saaro xeer-nidaamiye (regulations), Xeerka hab-dhaqanka (code of conduct), iyo awaamiir (Directives) aan ka hor imanayn xeerkan.

## Qodobka 27aad:
## Laalis

1. Xeerka Nidaamka Ururrada iyo Axsaabta Siyaasadda (Xeer Lr. 14/2000) waxaa badalay **Xeer Lr.14/2011**
2. Xeer kasta oo ka soo horjeeda Xeerkani waa waxba kama jiraan (null and void).

## Qodobka 28aad:
## Dhaqan-galka

Xeerkani waxa uu dhaqan-gelayaa marka ay Goleyaasha Xeer-dejintu ansixiyaan Madaxweynuhuna saxeexo.

| | |
|---|---|
| **Md: C/risaaq Siciid Ayaanle** | **Md: C/raxmaan Maxamed C/laahi (Cirro)** |
| **Xog. Guud ee Golaha Wakiilada** | **Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL** |
| --------------------------------- | ---------------------------------------- |

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE